# Ogeysiiska Macmiilka iyo Tafaariikhlaha: Alaabooyinka La Xiriira Kratom ee Hadda Sharci-darrada ka ah Ohio

***Taariikhda Lasoo saaray: 12/12/2025***
***Waxaa la cusbooneysiiyay: 12/16/2025***

***AFEEF:*** *Warbixinta ku jirta ogaysiiskan, looguma talagalin, mana ahan talo-bixin sharci ah; hase ahaatee, dhamaan warbixinta la bixinayo ujeedadeedu waa wargalin guud oo kaliya. Ogaysiiskan warbixinta ku jirta ma ahan wargalintii ugu danbaysay-ee-sharci ama xog kale. Golaha Farmasiiyada Gobalka ee Ohio ma bixin karo talo-bixin ka sii badan inta lagu sheegay ogaysiiskan. Waxii su'aalo ah oo dheeraad ah, akhristayaashu waa inay kala xariiraan qareen kala taliya wixii ku saabsan warbixinta lagu bixiyay ogaysiiskan.*

***Dhaqangalaya Diseembar 12, 2025, OAC 4729:9-1-01.1 waxay samaysaa dhammaan noocyada alaabooyinka la xiriira kratom ee sharci darada ah in la gado, la haysto, ama lagu qaybiyo gobolka Ohio. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sharcigaan degdega ah, eeg 3-da Tallaabo ee Falanqeynta Guddiga Farmasiga (www.pharmacy.ohio.gov/7OH) iyo Amarka Fulinta Guddoomiye DeWine.***

***Nuqul ka mid ah sharciga degdegga ah ayaa la heli karaa dhammaadka dukumiintigaan.***

**Waxaa loo arkaa inay yihiin alaabo kamid ah Kratom? (Waxaa la cusbooneysiiyay 12/16/2025)**

Alaabada kratom la xariirta waxaa ka mid ah dhammaan noocyada kratom-ka, oo ay kujiraan laakiin aan ku koobneyn, kuwaan soo socda:

- 7-hydroxymitragynine (oo mararka qaar loo yaqaan 7-OH);
- Mitragynine pseudoindoxyl;
- Dihydro-7-hydroxy mitragynine; iyo
- 7-acetoxymitragynine.

**XOG MUHIIM AH:** Xeerkaan **ma khuseeyo** mitragynine-ka go'doonsan, oo ay ku jiraan alaababa ka kooban kratom ka dabiiciga ah ee laga sameeyo dhirta.

**Sidee ku aqoonsan karaa alaabaha la xidhiidha kratom ee lagu mamnuucay sharcigaan? (Waxaa la cusbooneysiiyay 12/16/2025)**

Tafaariikhleyaashu waa inay raadiyaan alaabo kasta (kaabsuul, kiniino, kuwa la cabo, nacnac, cabitaan, iwm.) oo ay ku jiraan alaabaha kratom-ka la xidhiidha, oo ay ku jiraan waxyaalahaan soo socda:

- 7-hydroxymitragynine (oo mararka qaar loo yaqaan 7-OH);
- Mitragynine pseudoindoxyl;
- Dihydro-7-hydroxy mitragynine; iyo
- 7-acetoxymitragynine.




*Tusaalaha alaabaha la xariira Kratom. Maamulka Cuntada iyo Daawada ee Mareykanka. Ka Hortagga Faafitaanka Xiga ee Cudurka Opioid: Waxa Aad U Baahan Tahay Inaad Ka Ogaato 7-OH.* [https://www.fda.gov/media/187913/download?attachment](https://www.fda.gov/media/187913/download?attachment). *La helay Nufeembar 12, 2025.*

**Mamnuucidaan miyay khuseysaa alaabaha kratom sida kratom dabiiciga ah ee dhirta?**
**(Waxaa la cusbooneysiiyay 12/16/2025)**

Maya. Amarka fulinta ee gudoomiyaha ayaa si gaar ah uga reebaya kratom dabiiciga ah ee dhirta. Sidaas darteed, alaab kasta oo kratom ah oo ka kooban kratom dabiiciga ah ee dhirta kuma jiraan waxyaabaha la mamnuucay. Kuwa dhirta ka sameysan waxaa loola jeedaa alaabaha dhirta ee dabiiciga ah, gaar ahaan caleemaha geedka Mitragyna speciosa, laga soo saaray geedka ama kasoo jeeda geed.

kratom-ka dabiiciga ah waxa laga yaabaa in wali lagu soo rogo mamnuucid ay sharaxday Waaxda Beeraha ee Ohio: www.pharmacy.ohio.gov/ODAkratom.

### Ma jiraan shuruudo dheeraad ah oo loogu talagalay iibinta kratom dabiiciga ah ee dhirta? (Lagu daray 12/16/2025)

Haa, Dadka ku hawlan iibinta kratom-ka dabiiciga ah ee dhirta waxaa si xoog leh loogu dhiirigelinayaa inay dib u eegaan tilmaamahaan Waaxda Beeraha ee Ohio: www.pharmacy.ohio.gov/ODAkratom.

### Maxaan sameeyaa haddii aan helo alaab la xiriirta kratom oo saaran khaanadahayga ama ku jira alaabahayga?

Alaabahaan waa in isla markiiba la tuuraa.

### Maxay yihiin tallaabooyinka xiga ee Guddigu ka fiirsanayo inuu wax ka qabto kratom iyo alaabaha kratom-ka la xiriira ee Ohio?

***Alaabooyinka La riira Kratom:*** Xeerka degdega ah ee mamnuucaya alaabooyinka la xidhiidha kratom waxa uu shaqaynayaa 180 maalmood. Inta lagu jiro wakhtigaan, Guddigu wuxuu soo jeedin doonaa sharci joogto ah si looga mamnuuco dhammaan alaabaha la xiriirta kratom ee gobolka.

***Alaabaha Kratom (mitragynine oo kaliya):*** Alaabaha Kratom ee looga hadlay xeerkaan,Gudoomiye DeWine wuxuu ka codsanayaa Gudduga Farmasiiyada Gobalka Ohio inay eegaan mitragynine loo ballansan yahay in la eego, waxyaabaha la xariira opioid ee laga helay dhirta dabiiciiga ah ee kratom. Nidaamkaan wuxuu aqoonsan yahay in sharciga lagu dhisayo qawaaniinta kratom la soo bandhigay uuna ogolaanaayo dhageysiga mawduuca la xariira dhammaan dhinacyada danaynaya.